Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Barlamaan Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka Kalfadhiga 5aad

Documentiga Kalfadhiga 5aad Kulankiisa 13-aad

FiiriLifaaqa Warbixinta Miisaaniyadda 2015ka iyo Guddiga Madax-bannaan Xuduudaha iyo Federaalka iyo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka.

Kalfadhiga 5-aad **Tr:03/12/2014**

Kulankiisa:13-aad sacada furitanka.1:35 gh, sacada xiritanka.2:33 gd.

Guntinta: 139 Xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitanka Aayadaha Qu'raanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Akhrinta 1aad ee Miisaaniyadda sanadka 2015.**
4. **Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Guudiga Madaxa-bannan ee Xuduudaha iyo federaalka.**
5. **Qeybinta Hindise-Sharciyeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka.**

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane Muxamed Sheekh CusmaanJawaari**.**

Waxaa shirka Furay Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya

Mudane Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari. Waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyay Xildhibaan Maxamed Cabdulle Gasey.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxa uu xildhibaanada weydistay in ay Ansixiyan Ajendaha weyna Ansixiyen.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa ku soo dhaweyay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Mudane XuseenCabdi Xalane, si uu Golaha Barlamaanka ugu hor Akhriyo, Akhrinta 1aad ee Miisaaniyadda 2015 ka.

Wasiirka Wasaaradda maaliyadda Mudane Xuseen Cabdi Xalane, wuxuu Golaha Barlamaan ka kahor Akhriyay Miisaaniyada 2015ka, wuxuu dulmaray dhamaan inta qeybuu ka koobanyahay Qorshaha Miisaaniyadda 2015ka, Mudane Guddoomiye, Mudanayaal waxa sharaf ii ah in aan idiin soo gudbiyo faah-faahinta Miisaaniyada 2015-ka,taas oo ah markii sadexaad ee golaha shacabka iskugu yimaado ka doodida Miisaaniyadda joogtada iyo tan mashaariicda, intii dowladan ay jirtay, sida uu qabo xeerka maaliyadda iyo qaab xisaabaadka dowladda ee tirsigiisu yahay xeer 29 Disember 1961 N0.2 qodobka 13aad farqadiisa 1aad,waxaan idiin soo hordhigaya aMiisaaniyadda 2015 ka.

Waxaan fursadaan oga faa'ideysanayaa in aan halkan ogamahad celiyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka,Guddoomiye kuxigeenada,Guddiga Maaliyadda eeBarlamaanka iyo guud ahan xubnaha Barlamaanka sida hagrasho la'aanta ah ay iila shaqeeyan xiligii adkaa ee ansixinta miisaaniyadda sanadka 2014-ka.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu sheegey,waxaan u mahadcelinayaa wasiirka wasaarada maaliyadda, tixgalintii uu natixgaliyay iyo imaatinkaaga.

Xildhibaan: Ibraahim Ilkacas, wuxuu soo jeediyay, qarashaadka meesha uu ka imaanayo, waa canshuuraha badda iyo bariga manaheyno wax cadeyn ah, waxaa jirta lacag gaareysa ($33milyan), oo ahayd sanadkii la soo dhaafey iyo lacagaha deeqaha kuma cada meshan,waxaan rabaa in aad cadeyn igasiiso haday jirto iyo hadii kalaba.

Wasiirka: Mudane: Xuseen Cabdi Xalane, wuxuu sheegey, markii uu soo baxay ribodka wan ugu jawabnay (UN) lacagtasna waxey ahayd ($ 22malyan) wey jar-

jaren qoladii haysay waxeyna ku daren dahabka, waxaana soo gaartay ($9malyan),Bankiga dhexe wuxuu qaatey($ 3milyan) miisaaniyadda ayayna kujirtaa, 2015 ka wixii soo xarodo waan idinla socodsineyna.

Xildhibaan: Cabdulahi Jaamac, wuxuu sheegey, wasaarada maaliyadda in taas kabadan bay u xilsaarantahay, shilin soomaaliga kuma xusna Bankiga dhexe wuxuu rabaa shilin soomaali,mawaxaan taagnanaa Bankiga dhexe iyo wasaarada maaliyadda, wasiirka waa in ad no shegta wixii kuu qorsheysan oo cusub.

Wasiirka Mudane: Xuseen CabdiXalane wuxuu sheegey,Dhaqaalaha guudahaan waa in lahelo daqli soo galayoo o ah dib u dhiskadalka, dhaqaalaha waxaa xukuma waa ganacsiga iyo halka uu ka soo kabanayo,waxaa ka mid ah liinta, sisinta, kalluumeysiga, xoolo dhoofinta dhibato ayaa kajirto, badda cas ayay kadhoofiyan oo baddana kama dhofiyan, waan ku talo jirna in an kor u qaadno dhaqaalaha soomaaliya.

Xildhibaan: Cabdirashid Maxamed Xidig, wuxuu soo jeediyay,Dalka wuxuu noqday qofka ugu sareyo iyo qofka ugu hoseyo in ay qaatan Doolar,gormaayaa lo maleynaya in laga boxo oo laqaato shilin soomaali.

Wasiirka Mudane: Xuseen Cabdi Xalane, wuxuu sheegey,shiln soomaaliga wuxuu u baahanyahay in la soo daabaco,waxaa jirta dalka aynu walaalaha nahay ee sudaan in ay noo taalo ($50 milyan) oo ay noo soo daabacday,waanidiin laqabaa arintaas oo sida aad u daremaysana yan u daremayaa shilin soomaaligii waa sii dhamaanayaa oo suuqa ayuu ka siibaxayaa hadii alle idmo waan soo dabaceynaa.

Intaa Ka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka, wuxuu soo jeediyay,Guddoonka iyo Guddiga Maaliyadda ayaa kawada hadlayo sidii laga yeelilaha lacagta shilin soomaaliga,waxeyna u yeerayan Guddoomiyaha Bankiga Dhexe, ayagaan ka sugeynaa in ta ayna dhamaanin bishan December 24 keeda.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu ku soo dhaweyay,wasiirka wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Federalka Soomaaliya Mudane: Xildhibaan: Calahi Godax.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay, sharciga xuduudaha waa muhiim waa in uu wasiirk ahal mar is dhaafiyo.

Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guddaha iyo Federaalka Mudane: Cabdulahi Godax Bare, wuxuu Golaha Shacabka kahor Akhriyay, Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Guddiga Madaxa bannaan ee Xudduudaha iyo Fedaraalka iyo Guddiga Madaxa bannaan ee doorashooyinka, Wasiirka wuxuu dulmaray dhamaan qodobadii uu ka koobna Hindise Sharciyeedka oo ah(31qodob) waa mahadsantihiin Guddoomiyaha iyo xildhibaanada sharafta leh,waxaan ku faraxsanahay in la idiin qeybiyay labo Hindise Sharciyeed oo aad u muhiimsan sida, Guddiga Doorashooyinka iyo Guddiga xudduudaha federaalka,Hindise Sharciyeedkan markuu dhaqan galo wuxuu u madax-bananandoona in uu sameyo cilmibaaris Guddigan wuxuu noqon doonaa mid la taliya Barlamaanka, wuxuu sameyn doonaa la tashi, guddigan wuxuu ka koobanyahay (9 xubnood) guddoomiye,kuxigeen, iyo xogh'aye guud, iyo 6 xubnod kale, guddiga jiritaankisa waa 4 sano Hindise Sharciyeedkan isticmaalkisa waa hal mar marka la sameyo ayaan idiinku soo celinaynaa, Guddigan wuxuu masu'lka noqonaya goobaha Doorashooyinka iyo kaararka,wasaarada waxey soo gudbin doontaa ilaa (27xubnod) Guddigan waxaa soo ansixiyay Golaha Wasiirada,marka Barlamaanka ansixiyaan waxaa degrato ku soo saraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaan codsanayaa in nalo fududeyo oo la ansixiyo.

Intaa kadib Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay, waa mahadsanyahay wasiirka,

Guddiga Arrimaha Gudaha aad iyo aad ayay ugu soo shaqeyan Hindise Sharciyeedkan,waxaa manta halkan laga soo jeediyay 3 arrimood oo muhiim ah.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegey,waxaan amrayaa Xogh'ayaha Guud ee Barlamaanka in uu ku wareejiyo,Guddiga Maaliyadda iyo Guddiga Arrimaha Gudaha, Akhrinta manta halkan laga Akhriyay dukumentigoda.

Guddoomiyaha waxa kale uu soo jeediyay,Xildhibaano bari Tr:4/12/2014,in laga Doodidono hal Ajende oo ah mooshinka kalsooni kalanoqoshada xukuumadda, waa in ayna ii dhaafin maalinta sabtida oo cod loo qado,waa in an shaqeyno labada galinba hadii alla idmo.

Shir Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu shir Guddoominayay Kalfadhiga 5-aad, Kulankiisa: 13-aad, uu sheegey in uu shirka xiranyahay sacada markey ahayd 2:33gd.